IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMALIYA

الجمهورية الصومال الدمقراطية

Sannadka 10aad Muqdisho, 23 Luulyo 1982 L. 1 R 7

FAAHFAAHIN BIL SOO BAXA جريده شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

QIIMADU waa 5 Shiln lambar waliba—RUKUNKA: Sannadii waa Shs. 100 Somaliya gudaheeda—dibaddeedana waa Shs. 300. Ruknka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janayo Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxoo ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanka waxaa a weydiistaa laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah—lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## K O O B N I I N

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

W.M.

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 36 ee 6 Juun. 1982, Xeer-Nidaamiyaha Hawlaha Hay'adda Qaxootiga Qaranka BOG. 564

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 37 ee 10 Juun. 1982, Dhismaha iyo Qaabka Agaasinka Guud ee Maamulka Lacagta M. JDS. » 584

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 38 ee 20 Juun. 1982, Xil ka qaadidda Madaxweyne ku xigeenka 3aad ee JDS » 587

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 39 ee 20 Juun. 1982, Xil ka qaadidda Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka. » 588

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 14.7.82, Lumid Jeeg War. L. 194943 oo ku qoran Sugulle Maxamed Cabdulle L.270 » 589

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 14.7.82, Lumid Jeeg War. L. 194944 oo ku qoran Sugulle Maxamed Cabdulle L.271 » 590

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 20.7.82, Lumid Jeeg War. L 334798 ku qoran Xasan Tahar Diraac L.272 » 591

ISU YEERID CAADI DHAAF AH EE SHIRKADDA IVERSOM S.P.A. Lr. 597

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH.

QAYBTA KOOWAAD
XEER

Xeerka Madaxweynaha JDS, Lambar 36 taariikh C Juunyo 1982 Xeer Nidaamiyaha Hawlaha Hay'adda Qaxootiga Qaranka.

MADAXWEYNAHA J D.S.

MARKUU ARKAY: Qod.82aad ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Xeerka Madaxweynaha JDS, Lambar 26 ee 12ka Abriil 1981, kuna saabsan Dhismaha Hay'adda Qaxootiga Qaranka.

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in la soo saaro Xeer-nidaamiyaha si loo dhammeystiro Axkaanta Xeerka kor ku xusan, loona caddeeyo Xilalka, Hawlaha iyo Awoodaha Xubnaha Hay'adda Qaqootiga Qaranka.

WUXUU SOO SAARAYAA

(Qod. 1aad)

Xeerka soo socda:

GUDDIGA QARANKA EE ARIIMAHA QAXOOTIGA

1. Guddiga Qaranka ee Arrimaha Qaxootiga ee ku til maaman Qod. 8aad ee Xeerka Madaxweynaha JDS, Lambar 26 ee 12ka Abriil 1981, Xilkoodu wuxuu noqon doonaa sida soo Socota:

b) Tilmaan Guud ka bixinta maamulka iyo Siyaasadda daryeelka Qaxootiga Dalka ku sugan;

t) Talo ka soo Jeedinta Hay'adda iyo ku wareejinta Hawlaheeda Laamaha kale ee Dawladda;

j) Ilaalinta Guud iyo la socodka hawlaha daryeelka Qaxootiga Dalka ku sugan;

2. Awaamiirta, tilmaamaha iyo Go'aannada Guddiga Qaranka ee Arrimaha Qaqootiga, waxay ka soo baxayaan Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya oo Guddoomiyaha u ah.

3. Guddigu' wuxuu yeelanayaa fadhiyo caadi ah Saddexdii Biloodba mar.

4. Guddigu wuxuu kaloo yeelan karaa fadhyo aan caadi ahayn mar kasta oo ay yimaadaan duruufo caadi ahayn iyo mar kasta oo uu isugu yeero Guddoomiyuhu.

(Qod. 2aad)

XUBNAHA HAY'ADDA

Guddiga Qaranka ee Arrimaha Qaxoctiga ka sokow, Hay'addu waxay yeelaneysaa xubnaha soo socda:.

1. Guddiga maamulka iyo Fulinta.
2. Maamulaha Sare ee Qaxootiga.
3. Maareeyaha Guud.
4. Maareeyaha Guud Ku-xigeenka.
5. Siddeed Waaxood.
6. La-Talin Sharci.
7. Qaybta Qorshaha iyo Isuduwidda.
8. Isuduwayaasha Gobolada iyo Degmooyinka.
9. Maamulayaasha Xeryaha Qaxootiga.

(Qod. 3aad)

GUDDIGA MAAMULKA IYO FULINTA

1. Maamulaha Sare ee Qaxootiga, Maareeyaha Guud Maareeye Guud Ku-xigeenka iyo Maareeyayaasha Waaxyuha, waxay dhisayaan Guddiga Maamulka iyo Fulinta ee ku xusan Xeerka Madaxweynaha JDS, Lamabar 26 ee 12ka Abriil 1981.

2. Guddiga waxaa Guddoomiye u ah Maamulaha Sare ee Qaxootiga Qaranka.

(Qod. 4aad)

XILKA GUDDIGA MAAMULKA IYO FULINTA

1. Guddiga Maamulka iyo Fulinta Xilkoodu, wuxuu noqon doonaa sida soo socota:

b) Fulinta Mashaariicda horumarinta Qaxootiga iyo Go'aannada Guddiga Qaranka ee Arrimaha Qaxootiga;

t) Isuduwidda hawlaha Hay'addu u xilsaaran tahay ee ku tilmaaman Xeerka Madaxweynaha JDS, Lambar 26 ee 12ka Abriil 1981, iyo kuwa ku cad heshiisyada Caalamiga ah;

j) Go'aan ka gaaridda Arrin kasta oo dan u ah Qaxootiga, iyaga oo ka ambaqaadaya Go'aannada Guddiga Qaranka ee Arrimaha Qaqootiga, Siyaasadda Guud ee Dalka, gaar ahaan habka Maamulka toosan oo lagu fulinayo Himilada iyo aayaha dambe ee Qaxootiga;

x) Falaqaynta iyo Go'aan ka gaaridda Arrin kasta o uu u soo gudbiyo Guddoomiyuhu.

2. Guddiga Maamulka iyo Fulinta, waxay yeelanayaan fadhiy caadi ah Bishiiba Laba jeer ama mar kasta oo uu isugu yeero Guddoomiyuhu.

(Qod. 5aad)

MAAMULAHA SARE EE QAXOOTIGA

1. Maamulaha Sare ee Qaxootigu, wuxuu Hay'adda ku leeyahay awoodda ku tilmaaman qodobka 11aad ee Xeerka Madaxweynaha JDS, Lambar 26 ee 12ka Abriil 1981.

2. Maamulaha Sare ayaa ka Mas'uul ah Hoggaaminta hawlaha Hay'adda Guud ahaan.

3. Si gaar ah Maamulaha Sare, wuxuu Mas'uul ka yahay.

b) Maamulka Lacagta iyo hantida Hay'adda;

t) Saxiixa heshiisyada aan caalamiga ahayn;

j) Wax ka beddelka qorshaha Mashaaricda horumarinta Qaxootiga;

4. Si hawlaha Hay'addu habsami ugu socdaan, wuxuu Maareeyaha Guud ama cid kale u wakiilan karaa.

b) Amar ka bixinta hawlaha asaga u gaarka ah qaarkood;

t) Saxiixa Kharajka caadiga ah, iyadoo la tixgelinayo Miisaaniyadda Hay'adda.

(Qod. 6aad)

MAAREEYAHA GUUD EE HAY'ADDA

1. Hay'addu waxay leedahay Maareeye Guud ee lagu soo magacaabo Xeer Madaxweyne, ayada oo la dhegeystay talada Maamulaha Sare ee Qaxootiga

2. Maareeyaha Guud, waxuu fuliyaa hawlaha Hay'addu u xilsaaran tahay, si toos ah ama asaga oo ku adeeganaya hawl-wadeenada asaga hoos yimaada.

3. Maareeyaha Guud, ayaa xil ka saaran yahay habsami u socodka hawlaha Waaxyaha, Qeybaha, Xubnaha iyo Xafiisyada hoos yimaada.

4. Si gaar ah Maareeyaha Guud, wuxuu ka Mas'uul yahay;

b) Inuu bixiyo wixii amar lagama maarmaan ah si hawlaha maamulka Guud iyo Xisaabuhu hab quman ugu socdaan;

t) Amar ka bixinta qabashada hawlaha kala duwan ee Hay'addu u xilsaaran tahay;

j) Fulinta Go'aannada Guddiga Maamulka iyo Fulinta;

x) Diyaarinta iyo tilmaan ka bixinta qorshaha Mashaariicda Horumarinta Qaxootiga;

kh) Fulinta Awaamiirta Maamulaha Sare ee Qaxootiga;

d) Diyaarinta Ajandaha Fadhiyada Guddiga Maamulka iyo Fulinta ee Hay'adda;

r) La socodsiinta Maamulaha Sare wax qabadka Waaxyaha.

(Qod. 7aad)

MAAREEYE GUUD KU-XIGEENKA

Maareeye Guud ku-xigeenka xilkiisu Waa sida soo socota:

b) Inuu Gacan buuxda ku siiyo Maareeyaha Guud hawsha kala duwan ee Hay'addu u xilsaaran tahay;

t) Inuu Fuliyo hawlaha gaarka ah ee uu Maareeyaha Guud u xilsaaro, isagoo toos uga mas'uul noqonaya

j) Inuu sii wado hawlaha caadiga ah ee Maareeyaha Guud, marka uu maqan yahay ama ay jiraan sababo joogto ah ama ku meel gaar ah ee ka reebaya gudashada xilkiisa.

(Qod. 8aad)

1. Hay'addu, waxay leedahay Waaxyaha soo socoda:

b) Waaxda Farsamada iyo Gaadiidka;

t) Waaxda Saadka iyo Taakuleynta;

j) Waaxda Beeraha iyo Biyaha;

x) Waaxda Kormeerka iyo Baarista;

kh) Waaxda Maamulka Lacagta;

d) Waaxda Arrimaha Bulshada;

r) Waaxda Arrimaha Shaqaalaha;

s) Waaxda Xiriirka Guud iyo Faafinta.

2. Waax kasta, waxay leedahay xil iyo Shaqaale u gaar ah, waxaana Mas'uul toos uga noqonaya Fulinta xilkaas Maareeyayaasha Waaxyaha, Qaybaha iyo xubnaha ayaga hoos yimaada.

3. Maareeyayaasha Waaxyaha waxay si toos ah u hoos imaanayaan Maareeyaha Guud ee Hay'adda.

(Qod. 9aad)

WAAXDA FARSAMADA IYO GAADIIDKA

Xilka Maareeynta Waaxda Farsamada iyo Gaadiidku waa sida soosocota:

b) Ka warqabka Siyaasadda Dawladda ee horumarinta Qaxootiga Qaranka dhinaca Farsamada iyo Gaa diidka;

t) Isuduwidda qorshaha iyo dhismo waabab Shaqo iyada oo lala kaashanayo Xafiiska Ururka Qarumaha Midoobay u qaabilsan Qaxootiga iyo Hay'adaha kale ee Samafalka;

j) Xulka iyo hawlgelinta Shaqaalaha iyo Farsamayaqaanada ka shaqeeya Waababka Shaqo.

x) Hawlgelinta, la socodka iyo shaqo u kala qaybinta Shaqaalaha Waaxda;

kh) Dayactirka iyo hagaajinta Baabuurta iyo qalabka kale ee loo isticmaalo barnaamijka horumarinta Qaxootiga;

d) Rekibaadda iyo tijaabinta Makiinadaha iyo qalabka kale ee Hay'adda;

r) Diiwaan gelinta iyo qaa'imad ku qoridda (invantario) qalabka dayactirka Gaadiidka iyo alaabada kale oo ay Hay'addu leedahay cid kastaba gacanta ha ku haysee;

s) Qoraal ka reebidda iyo tirakoobka hawl qabadka Waaxda;

sh) Hubinta Habsami u isticmaalka kharajka Waaxda loogu tala galay iyo u sameyn xisaab celin quman;

dh) La socodsiinta Maareeyaha Guud hawlaha Waaxda, socodka Mashaariicda la wado iyo kuwa ku jira heerka qorsho.

(Qod. 10aad)

WAAXDA SAADKA IYO TAAKULEYNTA

Xilka iyo wax qabadka Maareeynta Waaxda Saadka iyo taakuleynta waa sida soo socota:

b) Ka warqabka Siyaasadda Dawladda ee ku saabsan deeqda cuntada loo fidinayo Qaxootiga;

t) Xog warran ka siinta Maareeyaha Guud hawl qabdka Waaxda;

j) Hawlgelinta, la socodka iyo shaqo u kala qeybinta Shaqaalaha Waaxda;

x) Isku xirka iyo xiriirinta Hay'adaha Dawladda ee ku shaqo leh quudka iyo Ururka Samafalka ee Caalamiga ah dhinaca qeybinta Raashinka iyo saadka kale;

kh) Qalqaalada Gaadiidka lagu qaadayo Quudka iyo alaabada kale ee lagama maarmaanka u ah nolosha Qaxootiga iyadoo mudnaan la siinayo baahida Deg degga ah;

d) Hubinta habsami uga Faa'iideysiga Gaadiidka la hayto;

r) Maamulka kharajka loogu tala galay kirada Gaadiidka, Bakhaarada, Iibka gudaha, dayactirka iyo habka xisaab celinta;

s) Ururinta akhbaarta Xeryaha Qaxootiga ee la xiriira Saadka;

sh) Warbixin ka diyaarinta iyo la socodsiinta Maareeyaha Guud Raashinka iyo alaabta bil walba soo gaara ama la qeybiyey;

dh) Xafidaadda qoraallada iyo tirakoobka hawlaha Waaxda.

(Qod. 11aad)

WAAXDA BEERAHA IYO BIYAHA

Maareeynta Waaxda Beeraha iyo Biyaha iyada oo dhinaca Farsamadda ka kaashaneysa Wasaaradda Bee raha, xilkeedu waa sida soo socota:

b) Fulinta iyo dhaqan gelinta qorshaha mashaariicda Beeraha iyo Biyaha ee Qaxootiga;

t) Ka warqabka Siyaasadda Dawladda dhinaca Beeraha iyo Biyaha;

j) La socodsiinta Maareeyaha Guud wax qabadka Waaxda;

x) Diyaarinta dhulka, Abuuridda iyo goynta miraha Beeraha Qaxootiga;

kh) Diyaarinta qalabka Beeraha loogu shaqeeyo iyo Maareyntiisa;

d) Dhismaha Keliyada iyo Biyo xireenada, Waraabinta dhulka iyo ka warbixinta wax soo saarka;

r) Sahminta dhul Beereed cusub iyo fidinta Beeraha Qaxootiga;

s) Hawlgelinta beeraleyda Qaxootiga;

sh) Hawlgelinta Khubarada shisheeye ee Beeraha iyo Biyaha ku shaqo leh;

dh) Ka xisaab celinta kharajka Mashaaricda Waaxdu hirgelinayso;

c) Qodista iyo dayactirka Ceelasha, Waraha iyo Berkadaha iyada oo dhinaca Farsamada ka kaashaneysa Wakaaladda Horumarinta Biyaha.

(Qod. 12aad)

WAAXDA KORMEERKA IYO BAARISTA

1. Maareeynta Waaxda Kormeerka iyo Baarista, xilkeedu waa sida soo socota:

b) Ka warqabka iyo ilaalinta habka socodsiinta Mashaariicda horumarinta Qaxootiga;

t) Kormeerka iyo la socodka madaxa iyo shaqaalaha hawl-wadeennada ka ah Gobolada iyo Degmooyinka sida ay xilkooda u gutaan;

j) Kormeerka iyo ka warbixinta maamulka Gaadiidka, Bakhaarada iyo hantida Hay'adda Guud ahaan;

x) Baarista Arrimaha gaarka ah ee uu u xilsaaro Maareeyaha Guud;

kh) La socodsiinta Maareeyaha Guud hawl qabadka Waaxda;

2. Maareeyaha Waaxda Kormeerka iyo Baaristu, wuxuu sameyn karaa kormeer kedis ah.

3. Waaxda oo uu kormeerkeedu saameyn karo hawlaha Hay'adda oo dhan, waxay ku soo gunaanadeysoo warbixin qoraal ah oo ay u soo gudbineyso Maareeyaha Guud.

(Qod. 13aad)

WAAXDA MAAMULKA LACAGTA

Xilka Maareeynta Waaxda Maamulka Lacagta waa sida soo socota:

b) Habaynta Miisaaniyadda kharajka caadiga ah ee Hay'adda iyo Mashaariicda horumarinta Qaxootiga;

t) La socodsiinta Maareeyaha Guud hawl qabadka Wiixda

j) Diyaarinta Mushaarka iyo Gunnooyinka dhiirigelintaee Shaqaalaha Hay'adda;

x) Habaynta kharajka Abaalmarnta dadka Qaxootiga ka tirsan iyo wixii kaalmo Lacageed ah ee loo fidiyo;

kh) Diyaarinta kharajka caadiga ah ee Qaxootiga iyo hubintiisa dambe;

d) Habaynta iyo haynta qoraallada iyo Diiwaannada xisaabaadka Hay'adda;

r) Diiwaan gelinta iyo keydinta qoraallada heshiisyada Hay'addu la gasho cid Saddexaad.

(Qod. 14aad)

WAAXDA ARRIMAHA BULSHADA

Xilka Maareeynta Waaxda Arrimaha Bulshada waa sida soo socota:

b) Sare u qaadidda garaadka iyo nolosho ijtimaaciga ah ee Qaxootiga;

t) Xaqiijinta iyo tallaabo ka qaadidda barnaamijka Waxbarashada caadiga ah iyo tan dadban iyadoo la raacayo habka iyo qorshaha Wasaaradda Waxbarashada;

j) Qabanqaabada iyo hergelinta tababarada xirfadeed ee dadka Qaxootiga ka tirsan.

x) Habaynta xannaanada dhallaanka iyo Carruurta yar yar, sirqaha iyo naafada Qaxootiga;

kh) Horumarinta fanka iyo ciyaaraha isboortiga ee Xeryaha Qaxootiga;

d) Talo ka bixinta dhibaatooyinka Bulshada ee dadka Qaxootiga ka tirsan;

r) Daryeelka Caafimaadka Qaxootiga iyo ka hortagga Cudurada faafa;

s) La socodsiinta Maareeyaha Guud hawl qabadka Waaxda;

(Qod. 15aad)

WAAXDA ARRIMAHA SHAQAALAHA

Xilka Maareeynta Waaxda Arrimaha Shaqaalaha waa sida soo socota:

b) Ka warqabka Siyaasadda Dawladda dhinaca Shaqada iyo Shaqaalaha;

t) Isuduwidda Shaqaalaha Hay'adda, habeynta Maamulooda iyo xog-warrankoodaba;

j) Talo ka bixinta Dallacaadda iyo Abaalmarinta Shaqaalaha Hay'adda, iyadoo la tixgelinayo warbixinta Madaxda ay Shaqaaluhu sida tooska ah u hoos yimaadaan;

x) Habaynta iyo talo ka bixinta qorista Shaqaalaha.

kh) Beddelka iyo fasax siinta Shaqaalaha Hay'adda Guud ahaan;

d) La socodsiin Maareeyaha Guud hawlaha Waaxda.

r) Xafidaadda galalka iyo waraaqaha rasmiga ah ee ku saabsan Shaqaalaha Hay'adda;

s) Qayb ka qaadashada Abaabulka iyo hirgelinta tababarada Shaqaalaha nooc kasta oo ay yihiin.

(Qod. 16aad)

WAAXDA XIRIIRKA GUUD IYO WARFAAFINTA

Xilka Maareeynta Waaxda Xiriirka Guud iyo Warfaafinta waa sida soo socota:

b) Ka Warqabka Siyaasadda Dawladda dhinaca barnaamijka iyo mashaariicda horumarinnta Qaxooti-

t) La socodka xaaladda iyo halka ay ku sugan yihiin Kooxaha Shaqaalaha iyo Khuburada Ajnabiga ah ee ka Shaqeeya Mashaaricda horumarinta Qaxootiga;

j) Diyaarinta Warbixinadda iyo qorshaha hawlaha Waaxda;

x) La socodsiinta Maareeyaha Guud hawlaha Waaxda;

kh) Ururinta akhbaarta iyo Macluumaadka ku saabsan Barnaamijka iyo xaaladda Qaxootiga Qaranka;

d) U xog warranka Hay'adda deeqda Qaxootiga u fidinta, Wakiilada Idaacadaha, Jaraa'idka iyo dadka Booqashada ku tegaya Xeryaha Qaxootiga;

r) Faafinta iyo baahinta wixii warar ah ee ku saabsan xaaladda Qaxootiga Dalka ku sugan;

s) Abaabulka booqashooyinka ay hay'adaha Caalamiga ah, laamaha Dawladda iyo dadka gaarka ah ku tageyaan xeryaha Qaxootiga;

sh) Talo ka siinta Maareeyaha Guud habka iskaashiga iyo wada shaqeynta hay'addu la leedahay Urura Caalamiga ah ee Samafalka oo gacan ka geysta taakuleynta iyo badbaadinta dadka Qaxootiga ah;

dh) U soo jeedinta Maareeyaha Guud, casuumadda dadka iyo hay'adaha doonaya in ay wax ka ogaadaan xaaladda dadka Qaxootiga ah ee Dalka ku sugan;

c) Isku xirka hawlaha hay'adda iyo kuwa kooxaha ajnabiga ah ee kala shaqeeya daryeelka dadka Qaxootiga ah.

(Qod. 17aad)

QAYBTA QORSHAHA IYO ISUDUWIDDA

Qaybta Qorshaha iyo isuduwidda, waxay toos u hoos timaadaa Maareynta Guud, xilkeeduna waa sida soo socota:-

b) Isuduwidda hawlaha mashaariicda iyo barnaamijka horumarinta dhaqaalaha Qaxootiga;

t) Diyaarinta talooyinka la xiriira mashaariicda;

j) Kormeerka iyo ka warqabka mashaariicda socota;

x) Qiimeynta iyo falanqeynta mashaariicda ay soo qaddimaan hay'adaha iyo ururka Samafalka;

kh) Tilmaamidda goobaha looga baahan yahay barnaamijko iyo wargelinta hay'adaha maalgelinta kara.

(Qod. 18aad)

QAYBTA WAAXYAHA

1. Waaxyaha kor lagu soo tilmaamay, waxay yeelan doonaan qaybo iyo kubno hoos yimaada oo lagu tilmaami doono qaabka hay'adda.

2. Qaybo iyo xubno kale waa la dhisi karaa marka loo baahdo.

(Qod. 19aad)

LA-TALINTA SHARCIGA

La-talinta Sharcigu, waxay toos u hoos timaadaa Maamulka Sare ee Qaxootiga, Xilkeeduna waa sida soo socota:-

b) Ka warqabka iyo la socodka heshiisyada lala galayo hay'adaha guud ahaan;

t) Kala talinta Maamulka Sare dhinaca Sharciyada Dalka iyo heshiisyada Caalamiga ah;

j) Habaynta iyo wax ka beddelka heshiisyada hay'addu la geleyso dadka saddexaad;

x) Kala talinta Maamulka Sare hawlaha in waxqabadka Waaxyuhu sharciga waafaaqsan yihiin;

kh) Diyaarinta, habeynta iyo talo ka bixinta wax allaale wixii Sharci la xiriira ee uu u xilsaaro Maamulka Sare.

(Qod. 20aad)

GUDDIYADA HOOSE

1. Hay'adda waxaa Gobolada iyo Degmooyinka Qaxootigu deggan yihiin mas'uul uga ah dhinaca socodsiinta hawlaheeda Guddiyada arrimaha Qaxootiga ee heer Gobol, Degmo iyo Xero ee ku tilmaaman qod-

dobka 10aad ee Xeerka Madaxweynaha JDS, lambar 26 ee 12ka Abriil 1981.

2. Xilka iyo waajibaadka Guddiyada ku tilmaaman xubinta 1aad ee qodobkan waxaa lagu qeexi doonaa Guddoon uu soo saaro Maamulka Sare ee Qaxootiga Qaranka, isagoo dhegeystay Guddiga Maamulka iyo Fulinta.

(Qod. 21aad)

GUDDIGA ARRIMAHA QAXCOTIGA EE GOBOLKA

1. Isuduwaha Qaxootiga ee Gobolka, isuduwe kuxigeenka, isuduwayaasha Degmooyinka iyo Madaxda Laamuhu waxay dhisayaan Guddiga Arrimaha Qaxootiga ee heer Gobol;

2. Guddiga waxaa Guddoomiye u noqonaya isuwaha Gobolka ee Qaxootiga, isaga ayaana mas'uul ka ah oo matalaya midnimada maamulka Qaxootiga Gobolka, isla maarkaana ay ka amar qaadanayaan shaqaalaha iyo Madaxda Laamaha oo dhan.

(Qod. 22aad)

GUDDIGA ARRIMAHA QAXOOTIGA EE DEGMADA

1. Isuduwaha Qaxootiga ee Degmada, isudawe Ku-xigeenka, maamulayaasha Xeryaha Qaxootiga iyo Saad-haayuhu waxay dhisayaan Guddiga arrimaha Qaxootiga ee heer Degmo.

2. Guddiga waxaa Guddoomiye u noqonaya isuduwaha Qaxootiga ee Degmada.

(Qod. 23aad)

GUDDIGA XERADA

1. Maamulka Xerada, Maamule ku-xigeenka, saad-hayuhu iyo Guddoomiyeyaasha Xaafadaha xeradu ka kooban tahay, waxay dhisayaan Guddiga Xerada ee Qaxootiga.

2. Guddiga, waxaa Guddoomiye u noqonaya Maamulaha Xerada Qaxootiga.

(Qod. 24aad)

GUDDIGA BULSHADA EE QAXOOTIGA

1. Qaxootiga heer bulsho, waxaa maamulaya Guddiyo hoosaad ka dhisan dadka Qaxootiga ka tirsan.

2. Guddigaas waxay hoos imaanayaan Guddiga Xerada ee ku tilmaaman qodobka 23aad ee Xeerkan.

3. Guddiyada bulsho ee Qaxootigu waxay ka kooban yihiin:

b) Xaafad: waxay ka kooban tahay degaanka xerada oo afar loo qaybiyay qayb, waxaana maamula guddi ka kooban toban ruux ee uu madax u yahay Guddoomiye Xaafadeed;

t) Laan : waxay ka kooban tahay xaafadda oo siddeed loo qeybiyay qayb waxaana maamula guddi ka kooban toddoba ruux ee uu Madax u yahay Guddoomiye Laameed;

j) Cudud : waxay ka kooban tahay laanta oo laba loo qaybiyey qayb, waxaana maamula guddi ka kooban shan ruux oo uu Madax u yahay Guddoomiye Cudud.

4. Guddiyada Bulshada ee Qaxootiga waxay yeelan karaan Guddiyo hoosaad hoos yimaada.

(Qod. 25aad)

XILKA GUDDIYADA BULSHADA

Maamulaha Sare ee Qaxootiga ayaa soo saaraya tilmaamo faahfaahinaya hawlaha iyo waajibaadka Guddiyada Bulsho ee Qaxootiga.

(Qod. 26aad)

ILAALINTA GUUD

1. Xoghayayaasha X.H.K.S. ee Gobolada iyo Degmooyinka Qaxootigu deggan yihiin, waxay xubnaha hay'adda halkaas u jooga ku leeyihiin ilaalinta guud oo ay ku leeyihiin laamaha kale ee Maamulka Dawladda.

2. Madaxda Gobolka, waxaa waajib ku ah inay isuduwayaasha Gobollada Degmooyinka iyo Maamulayaasha xeryaha Qaxootiga gacan buuxda ku siiyaan gudashada xilkooda.

(Qod. 27aad)

XUQUUQDA SHAQAALAHA

1. Xuquuqda iyo waajibaadka Sharciga ah iyo kuwa dhaqaale ee shaqaalaha joogtada ah ee hay'adda, waxaa lagu dhaqayaa sharciga shaqaalaha rayidka ee Dawladda iyo Xeerka shaqaalaha Wakaaladaha Madaxa bannaan qodobbadooda la socon kara dabeecadda iyo shaqada hay'adda.

2. Shaqaalaha joogtada ah ee hay'adda waa kuwa laga soo ergeystay Wasaaradaha iyo Wakaaladaha, waxayna mashaarooyinkooda iyo xuquuqdooda kale ee dhaqaale ee kale ka qaadanayaan hay'adihii ay hore uga tirsanaayeen.

3. Maamulaha Sare ee Qaxootigu, isaga oo tixgelinaya duruufaha gaarka ah iyo dabeecadda shaqada hay'adda, dhegeystayna Guddiga Maamulka iyo Fulinta, wuxuu goyn karaa in Maareeyaasha Waaxyaha, Madaxda Qaybaha, Xubnaha, Laamaha iyo Shaqaalaha kale la siiyo gunnooyin gaar ah ee dhiirigelin ah.

4. Isla habkaas Maamulaha Sare ee Qaxootiga wuxuu ku goyn karaa sahayda safarka iyo gunnada jid marka Shqaalaha.

(Qod. 28aad)

QORRINKA SHAQAALAHA

1. Hay'addu waxay qoran kartaa Shaqaale iyada oo hormarin iyo mudnaan gaar ah siineyso dadka Qaxootiga ka tirsan.

2. Marka ay jirto baahi deg deg ah, Maamulaha Sare ee Qaxootigu wuxuu qori karaa shaqaale ku meel gaar ah, oo muddada shaqadoodu ayan ka badneyn saddex bilood, iyada oo aan la raacin habka shaqa qorista ee caadiga ah.

3. Shaqaalahaas hay'addu qoraneyso, waxaa lagu dhaqayaa heshiisyo gaar ah ee lala galo iyo sharciga shaqada ee caamka ah.

(Qod. 29aad)

BURIN SHARCI

Xeer kasta oo aan la socon karin, ama ka soo horjeeda Xeerkan waa la buriyey.

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynahu, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 6 Juunyo 1982

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS, ee L, 37 ee 14 Juunyo 1982, Dhismaha iyo qaabka Agaasimaha Guud ee Maamulka Lacagta M. J D.S.

MARKUU ARKAY: Dastuurka JDS, Qod. 64, 86, iyo 73aad;

MARKUU ARKAY: Xeerka Lambarkiisu yahay 2 ee 29kii Diseembar 1961dii, kuna saabsanaa ammarka Maamulka xisaabaadka Dawladda;

MARKUU ARKAY: Xeerka Lambarkiisu yahay 20 ee 20kii Maarso 1965kii kuna saabsanaa habeynta Dhismaha qaabka joogtada ahaa Madaxtooyadii hore ee Golaha Wasiirrada iyo Xafiiska la xiriiray iyo isbeddelkii ka dmabeeyay;

MARKUU ARKAY: Xeera Madaxweynaha J. D. S. Lam. 83 ee 3.9.1977, Dhismaha Agaasinka Guud ee Lacagta M.J.D.S;

MARKUU TIXGELIYEY: Ra'yiga Wasiirka Madaxtooyada;

MARKUU AQOONSADAY: In ay lagama maarmaan tahay in la dhiso, dibna loo habeeyo Qaabka Agaasinka Guud ee Maamulka Lacagta Madaxtooyada JDS, kaddib markii ay hawshiisa si aad ah u ballaaratay.

WUXUU XEERIYEY

Qod. 1aad

(Agaasinka Guud ee Lacagta M.J.D.S )

Agaasinka ee Maamulka Lacagta Madaxtooyada wuxuu ka mid yahay Laamaha Madaxtooyada JDS, waxaana lagu dhisay sharciga lambar 13 ee 20.3.1965 iyo isbeddelkii ka dambeeyey, wuxuuna si toos ah ugu xirayn yahay Madaxweynaha JDS, xagga Maamulka Miisaaniyadda Madaxtooyada JDS.

Qod· 2aad

(Hawsha Agaasinka)

Agaasinka Guud ee Maamulka Lacagta Madaxtooyada JDS, waxaa loo xilsaaray inuu fuliyo hawlaha soo socda:

1. Wax allaale wixii hawl ah ee la xiriira maamulka lacagta ee Madaxtooyada J.D.S. iyo dhammaan laamaha ku xeeran.

2. Oggolaanshaha socdaallada ee dibedda ku aadaan dhammaan shaqaalaha hay'adaha Dawladda ee shaqo ama ka qaybgal shirar, iyo beddelaadda lacagta safarka loo qaato asagoo had iyo jeer kala arrinsanaya Madaxweynaha JDS·

3: Inuu marti gelio martida heerka Dawladeed dalka ku soo gasha.

Qod. 3aad

QAABKA AGAASINKA

Agaasinka Guud ee Maamulka Madaxtooyada wuxuu yeelan doonaa qaabka halkan ku lifaaqan oo ka mid ahaan doono xeerkan.

Qod. 4aad

XILKA IYO AWOODDA AGAASIMAHA GUUD

Agaasimaha Guud ee madax ka ah Agaasinka Guud ee Maamulka Lacagta ee Madaxtooyada JDS, waxaa xil ka saaran, awoodna uu u leeyahay:

1. Kormeerka, habeynta, socodsiinta iyo qaybinta hawlaha Agaasinka, isagoo daryeelaya danta guud ee Dawladda.

2. Tijaabooysnka la xiriira edbinta shaqaalaha· isagoo raacaya habka sharcigu farayo.

3. Bixinta talooyinka loo baahan yahay ee ku saabsan hawlaha Agaasinka.

4. La socodsiin Madaxweynaha JDS, wixii dhibaatooyin ah ee hadba Agaasinka soo foodsaara·

Qod. 5aad

(WAAXAHA QAYBAHA IYO XUBNAHA)

Agaasinka Guud ee Lacagta MJDS, wuxuu yeelalan doonaa, si uu u fuliyo hawlaha loo xilsaaray waaxyo, qaybo iyo xubno isda ku cad lifaaqa.

Qod. 6aad

(MAGACAABIDDA AGAASINKA GUUD)

Agaasinka Guud ee Maamulka Lacagta MJDS, waxaa magacaabaya xeer uu soo saaro Madaxweynaha JDS.

Qod. 7aad

MAGACAABIDDA AGAASIMAYAASHA WAAXYAHA AGNL/MJDS.

Agaasimayaasha waaxyaha waxaa lagu magacaabi doonaa xeer uu soo saaro Madaxweynaha JDS, kaddib markuu, dhegeysto soo jeedinta Wasiirka Madaxtooyada iyo talada Agaasimaha Guud ee Lacagta MJDS.

Qod. 8aad

BURRIN XEER

Waxaa la burriyey Xeerka Lambarkiisu yahay 13 ee soo baxay 20kii Maarso 1965kii iyo wax allaale wixii xeer ah ee qodobbada xeerkan khilaafsan ama aan la coson karin.

Qod. 9aad

Xeerkan wuxuu uu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Jaalle Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 14 Juunyo 1982

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

WASIIRKA MAALIYADDA
(J/le Cabdul'hi Axmed Caddow)

WASIIRKA MADAXTOOYADA J.D.S.
(J/le G/Sare Muuse Rabiile Good)

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY

Diiwaanka Lamb. 5 Bog. Lamb. 129
Muqdisho 14 Juun. 1982,
Hanti Dhawraha Guud,
Dr. Xuseen Cabdulle Cali

AGAASINKA GUUD EE LACAGTA M. J. D. S.SOO KOOBIDDA JAGOOYINKA UU U KALA BAXO WAAX IYO DARAJO

| | A/2 | A/3 | A/5 | A/6 | Isugeyn | B/7 | B 8 | Isugeyn | C | Isug | D | Tiro Guud |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| AG.GUUD EE M. LACAGTA MJDS | 1 | — | — | 2 | 3 | 2 | 5 | 7 | 17 | 17 | 5 | 32 |
| AG.WAAXDA LACAGTA/SHAQ. | — | 1 | 1 | 3 | 5 | 3 | 14 | 17 | 27 | 27 | 5 | 54 |
| AG.VILLOOYINKA/BEERAHA | — | 1 | 1 | 2 | 4 | 5 | 5 | 10 | 100 | 100 | 5 | 119 |
| OG.WAAXDA FARSAMADA | — | 1 | 1 | 3 | 5 | 7 | 77 | 84 | — | — | 5 | 94 |
| AG.DAYCTIRKAXARUNTA | — | 1 | 1 | 1 | 3 | 3 | 3 | 6 | 16 | 16 | 20 | 45 |
| Isugeyn Guud | 1 | 4 | 4 | 11 | 20 | 20 | 104 | 124 | 160 | 160 | 40 | 344 |

QAABKA AGAASINKA GUUD EE LACAGTA M.J.D.S.
AGAASINKA GUUD EE LACAGTA M.J.D.S.

| Jago Lamb. | Habka & Jagada | Darajo | Xirfad | Tirada |
|---|---|---|---|---|
| 69—0001 | Agaasime Guud | A/2 | Maamul | 1 |
| 69—0002 | Xoghaynta Ag.Guud | C/8 | » | 1 |
| 69—0003 | Madax Xubin Xusuus-dhowr | A/6 | » | 1 |
| 69—0004 | Madax Xubin Keydka | A/6 | » | 1 |

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| 69—0005/6 | Keydiye | B/7 | » | 2 |
| 69—0007/11 | Karraani | B/8 | Karraani | 5 |
| 69—0012 | Makiino Roge | C/8 | Farsamo | 1 |
| 69—0013 | Makiino Garaace | C/8 | Karraani | 4 |
| 69—0014/26 | Kayd-haye | C/8 | Maamul | 10 |
| 69—0027 | Madax Adeege | C/8 | Sh.Hoose | 1 |
| 69—0028/32 | Adeege | D | Sh.Hoose | 5 |

AGAASINKA WAAXDA LACAGTA IYO SHAQAALAHA

| Jago Lamb. | Habka iyo Jagada | Darajo | Xirfad | Tirada |
|---|---|---|---|---|
| 69—1001 | Agaasime Waax | A/3 | Maamul | 1 |
| 69—1002 | Madax Qeyb Lacag.Shaq. | A/5 | Maamul | 1 |
| 69—1003 | Madax Xubin Lacag | A/6 | Maamul | 1 |
| 69—1004 | Madax Xubin Shaqaale | A/6 | Maamul | 1 |
| 69—1005 | Madax Xubin Qaansheeg | A/6 | Maamul | 1 |
| 69—1006/8 | Sarkaal Fuliye | B/7 | Maamul | 3 |

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| 69—1009/22 | Xisaabiye | B/8 | Xisaabiye | 14 |
| 69—1023/49 | Karraani | C/8 | Karraani | 27 |
| 69—1050/54 | Adeege | D | Shaq.Hoose | 5 |

AGAASINKA WAAXDA FILLOOYINKA

| Jago Lamb. | Habka iyo Jagada | Darajo | Xirfad | Tirada |
|---|---|---|---|---|
| 69—2001 | Agaasime Waax | A/3 | Maamul | 1 |
| 69—2002 | Madax Qeyb | A/5 | Maamul | 1 |
| 69—2003 | Madax X.F/Baar | A/6 | Maamul | 1 |
| 69—2004 | MadaxXB/Ugaar | A/6 | Maamul | 1 |
| 69—2005 | Kariye Sare | B/7 | Maamul | 1 |
| 69—2006 | Madax Baar | B/7 | Maamul | 1 |
| 69—2007 | Khasnaji | B/7 | Maamul | 1 |
| 69—2008 | Baariste | B/7 | Maamul | 1 |
| 69—2009 | Madaxa Ug.Beerta | B/7 | Maamul | 1 |
| 69—2010/11 | Soore Sare | B/8 | Xirfadle | 2 |

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| 69—2012 | Sarmale | B/8 | Xirfadle | 1 |
| 69—2013 | Matoriste | B/8 | Xirfadle | 1 |
| 69—2014 | Keyd-haye | B/8 | Xirfadle | 1 |
| 69—2015/17 | Karraani | C/9 | Karraani | 3 |
| 69—2018/42 | Soore | C/9 | Xirfadle | 25 |
| Jago Lamb. | Habka iyo Jagada | Darajo | Xirfad | Tirada |
| 69—2043/59 | Kariye | C/9 | Xirfadle | 17 |
| 69—2060/64 | Dhar-dhaqe | C/9 | Xirfadle | 5 |
| 69—2065/104 | Beeraleey | C/9 | Xirfadle | 40 |
| 69—2105/114 | Nadiifiye | C/9 | Sh.Hoose | 10 |
| 69—2115/119 | Adeege | D/11 | Sh.Hoose | 5 |

## AGAASINKA WAAXDA FARSAMADA

| Jago Lamb. | Habka iyo Jagada | Darajo | Xirfad | Tirada |
|---|---|---|---|---|
| 69—3001 | Agaasime Waax | A/3 | Maamule | 1 |
| 69—3002 | Madax Qeyb Farsamo | A/5 | Maamule | 1 |
| 69—3003 | Madax Xubin Biyo | A/6 | Maamule | 1 |

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| 69—3004 | Madax Tap/Falag. | A 6 | Maamule | 1 |
| 69—3005 | Madax Dhirta/Rinji | A 6 | Maamule | 1 |
| 69—3006/13 | Madax Xirfadle | B 7 | Maamule | 8 |
| 69—3014/22 | Koronto-yaqaan | B 8 | Xirfadle | 9 |
| 69—3023 | Alxanle | B/8 | Xirfadle | 1 |
| 69—3024/28 | Tubiiste | B 8 | Xirfadle | 5 |
| 69—3029/32 | Ceel-yaqaan | B/8 | Xirfadle | 4 |
| 69—3033/40 | Tapeziere | B/8 | Xirfadle | 8 |
| 69—3041/49 | Falagname | B 8 | Xirfadle | 9 |
| 69—3050/59 | Muratore | B/8 | Xirfadle | 10 |
| 69—3060/69 | Rinjiile | B/8 | Xirfadle | 10 |
| 69—3070/79 | Shufeer | B 8 | Xirfadle | 10 |
| 69—3080/89 | Telefoniste | B/8 | Xirfadle | 10 |
| 69—3090/94 | Adeege | D | Sh.Hoose | 5 |

# AGAASINKA WAAXDA DAYACTIRKA

| Jago Lamb. | Habka iyo Jagada | | | |
|---|---|---|---|---|
| 69—4001 | Agaasime Waax | A/3 | Maamule | 1 |
| 69—4002 | Madax Qeyb Dayac. | A/5 | Maamule | 1 |
| 69—4003 | Madax Xubin | A/6 | Maamule | 1 |
| 69—4004/6 | Fuliye | B/7 | Maamule | 3 |
| 69—4007 | Karraani | B/8 | Karraani | 1 |
| 69—4008/9 | Falagname | B/8 | Xirfadle | 2 |
| 69—4010/25 | Beeraleey | B/9 | Xirfadle | 16 |
| 69—4026/45 | Nadiifiye | D | Sh.Hoose | 20 |

Xeerka Madaxweynaha J.D.S. Lambar 39, taariikh 20 Juun 1982, Xil ka qaadidda Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qod 84aad ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Xeerka Madaxweynaha J.D.S. Lambar 33 ee 28ka Abriile 1981 oo lagu magacaabay Madaxweyne ku-xigeenka 2aad, 3aad, ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

MARKUU TIXGELIYEY: Go'aanka Guddiga Siyaasadda Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed ee 9ka Juun 1982, Go'aankaasoo Guddiga Siyaasaddu ku guddoonsaday in Ismaaciil Cali Abokor laga qaado xilalka uu Dalka ka hayo, kadib markii baaris lagu sugay in ay Gacanta kula jireen, isaga iyo dad kale oo ka mid ah Madaxda Dalka arrimo Qaran dumisnimo ah.

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in Go'aankaas la fuliyo.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Laga billaabo 9ka Juun 1982, Cumar Xaaji Maxamed Xirsi waxaa laga qaaday Xilkii uu Qaranka Soomaaliyeed u hayey ee Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka.

Qod. 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 20 Glu. 1982

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(Maxamed Siyaad Barre)

Xeerka Madaxweynaha JDS Lambar 38 taariikh 20 Juun 1982 Xil ka qaadidda Madaxweyne ku-xigeenka 3aad ee JDS.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qod 84aad ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Xeerka Madaxweynaha J.D S. Lambar 33 ee 28ka Abriile 1981 oo lagu magacaabay Madaxweyne ku-xigeenka 2aad, 3aad, ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

MARKUU TIXGELIYEY: Go'aanka Guddiga Siyaasadda Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed ee 9ka Juun 1982, Go'aankaasoo Guddiga Siyaasaddu ku guddoonsaday in Ismaaciil Cali Abokor laga qaado xilalka uu Dalka ka hayo, kadib markii baaris lagu sugay in ay Gacanta kula jireen, isaga iyo dad kale oo ka mid ah Madaxda Dalka. arrimo Qaran dumisnimo ah.

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in Go'aankaas la fuliyo.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Laga Billaabo 9ka Juun 1982, Ismaaciil Cali Abokor waxaa laga qaaday xilkii uu Qaranka Soomaaliyeed u hayey ee Madaxweyne ku-xigeenka 3aad ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Qod. 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 20 Glu. 1982

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(Maxamed Siyaad Barre)

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER

UJEEDDO: Ka soo Saaris Faafin Jeeg, L.Y.357879,

GUDDOOMIYUHU MARKUU ARKAY: Dacwadda L. Y. 84/82 ee uu ku sheeganaayo Jaalle Yaasiin Malaw Naaleeye inuu ka Lumay Jeeg Wareega L. Y. 357879 oo uu ka Qaatay Bangiga Ganacsiga Laanta Burco, uu Codsadayna in la Siiyo Jeegga Lumay lacagta ku qornaydna ay ahayd Shs. 8.000

MARKUU ARKAY: BAAFINTA BANKIGA TAARIIKA 10.6.82;

MARKUU ARKAY: Codsiga Bnkiga Ganacsiga Laanta Burco Taariikh 19.7.82 ee uu Codsanaayo Amarto in Lumista Jeegga lagu soo saaro Faafinta Rasmiga si loogu celiyo Lacagta Jeegga Ninka lahaa;

MARKUU ARKAY: Qod. 69,D,L, Del 9.9.65.

WUXUU AMRAYAA

In lagu soo saaro Lumis Jeegga L. Y. 3578.) haddii cid kale Sheegan waydo Jeeggaa 30 Cisho Dabadeed Faafinta kaddib Gacanta ha laga saaro Lacagta Jaalle Yaasiin Malaw Naaleeye.

Burco, 20.7.82.

GUDDOOMIYAMA MAX. G. TOGDHEER

(Dr. Dayib Sh. Abuukar)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeegga Wareega oo lambarkiisu ahaa 194943 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xis.Guud kuna qoran lacag dhan Sh. So. 50.000/= uu iskalahaa Sugulle Maxamed Cabdulle sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 005856 taariikhdeedu tahay 13.7.82 ee Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xis. Guud;

HADDUU ARKAY: Qod.69 Sharciga Lam.2 ee 9.9.65;

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Wareega Lam. 194943 oo ku qoran Sugulle Maxamed Cabdulle ayna ku jirto Sh. So. 50.000/=.

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Xis. Guud u beddelo Jaalle Sugulle Maxamed Cabdulle Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah kaddib markey ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan wax is-hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 14.7.1982

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax)

L. 270

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeegga Wareega dhumay oo lambarkiisu ahaa 194944 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xis. Guud kuna qoran lacag dhan Sh.So. 50.000/= uu iska lahaa Jaalle Sugulle Maxamed Cabdulle sida ku cad warqadda lambarkeedu ahaa 005856 taariikhdeedu 13.7.82 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xis.Guud;

HADDUU ARKAY: Qod.69 Sharciga Lam.2 ee 9.9.65;

WUXUU XEERIYEY

In la (Ammortamento) Jeegga Wareega L. 194944 oo ku qoran Sugulle Maxamed Cabdulle ayna ku jirto Sh. So. 50.000/=.

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Xis. Guud u beddelo Jaalle Sugulle Maxamed Cabdulle Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah kaddib markey ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan wax is-hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 14.7.1982

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax)

L. 271

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeegga Wareega dhumay oo lambarkiisu ahaa 334798 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa L. 2aad kuna qoran lacag dhan Sh. So. 50.000/= uu iska lahaa Xasan Tahar Diraac sida ku cad warqadda lambarkeedu ahaa 006101 taariikhdeedu ahayd 20.7.82 ee Bakiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Qaybta Xis.Guud;

HADDUU ARKAY: Qod.69 Sharciga Lam.2 ee 9.9.65;

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga War. Lam. 334798 oo ku qoran Xasan Tahar Diraac ayna ku jirto Sh.- So. 50.000/=.

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta 2aad Hargeysa u beddelo Xasan Tahar Diraac Jeegga War. ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah kadib markey ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15/= maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax Is-hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 20.7.1982

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax)

L. 272

# ISU YEERID CAADI DHAAF AH EE SHIRKADDA IVERSOM S.P.A.

Saamileyda Shirkadda IVERSOM, S.P.A., waxaa la isugu yeeray shir caadi dhaaf ah oo lagu qaban doono Saldhigga Shirkadda maalinta bisha Agosto ta hay 14ka sacadduna tahay 10:00 subaxnimo. Haddii fadhiga hore la waayo aqlabiyad, waxaa fadhiga kale la qabanayaa maalinta bisha Agosto tahay 16ka isla saacaddaasi si looga hadlo arrimaha kala ah :

1) Kordhinta Maaliyadda Shirkadda.

2) Xaddidaadda Gunnada Maamulayaalka.

3) iyo wixii kale ee door la bido.

Muqdisho, 14.7.1982.

Maamulaha Avv. Ismaaciil Jimcaale